

Kiridhitka Minnesota ee Caruurta Waaweyn ee U qalma: Caawinta qoysaska iyo carruurta!



Kiridhitka Caruurta Waaweyn ee U qalma waxay siisaa cashuur dhimis shakhsiyaadka carruurta leh. Kiridhitku waxay kaa dhimi kartaa canshuurta lagugu leeyahay waxayna ku siin kartaa canshuur celin.

Miyaan xaq u leeyahay inaan helo Kiridhitka Carruurta Waaweyn ee u Qalma?
Guud ahaan, waa inaad buuxisaa shuruudahan si aad u dalbato Kiridhitka Caruurta Waaweyn ee U qalma.

- Waxaad ku noolayd Minnesota sanadka oo dhan ama qayb ka mid ah sanadkii 2023 (iyada oo laga dhaafayo xubnaha milatariga)
- Inaadan ahayd qof ku tiirsan cid kale
- Inaad leedahay hal ama in ka badan “carruur waaweyn oo u qalma” sida ay qeexday IRS

Waa imisa?

Kiridhitka ugu badan waa:

- \$925 marka uu jiro hal ilmo oo weyn oona u qalma
- \$2,100 marka ay jiraan laba ilmo oo weyn oona u qalmaan
- \$2,500 marka ay jiraan saddex ilmo oo weyn oona u qalmaan

Kiridhitka ayaa hoos u dhacaysa boqolkiiba lacagta aad sameyso ama wadarta dakhliga aad haysato ka dib marka wax kasta laga jaro, hadba mid ka badan. Haddii aad codsanayso Kiridhitka Caruurta marka lagu daro kiridhitkan, waxaa la dhimay 12% dakhligaaga. Haddii kale, waxaa la dhimay 9% dakhligaaga.

Sideen u sheegan karaa?

Codso Kiridhitka Caruurta Waaweyn ee U qalma adoo isticmaalaya Jadwalka M1CWFC, *Kiridhitka Ilmaha iyo Kiridhitka Xubinka u shaqeeya Qoyska ee Minnesota*.

Waxa kale oo aad u qalmi kartaa diyaarinta cashuur celinta bilaashka ah! Tag www.revenue.state.mn.us gali **free tax preparation** sanduuqa wax laga raadiyo si aad u heshid adeegyada diyaarinta canshuurta bilaashka ah ee kuu dhaw.

